

HUMAN RIGHTS WATCH

# LAHAYSTAYAASHA WAARDIYEYAASHA GANJEELKA

## Xadgudubyada Ka Dhanka ah Dadka Wadanka Gudihiisa Ku Barakacay ee Ku Sugan Muqdisho, Soomaaliya



HUMAN RIGHTS WATCH

# Lahaystayaasha Waardiyeyaasha Ganjeelka

## Xadgudubyada Ka Dhanka ah Dadka Wadanka Gudihiisa Ku Barakacay ee Ku Sugan Muqdisho, Soomaaliya

Copyright © 2013 Human Rights Watch
All rights reserved.
Printed in the United States of America
Cover design by Rafael Jimenez

Human Rights Watch is dedicated to protecting the human rights of people around the world. We stand with victims and activists to prevent discrimination, to uphold political freedom, to protect people from inhumane conduct in wartime, and to bring offenders to justice. We investigate and expose human rights violations and hold abusers accountable. We challenge governments and those who hold power to end abusive practices and respect international human rights law. We enlist the public and the international community to support the cause of human rights for all.

Human Rights Watch is an international organization with staff in more than 40 countries, and offices in Amsterdam, Beirut, Berlin, Brussels, Chicago, Geneva, Goma, Johannesburg, London, Los Angeles, Moscow, Nairobi, New York, Paris, San Francisco, Tokyo, Toronto, Tunis, Washington DC, and Zurich.

For more information, please visit our website: http://www.hrw.org

Human Rights Watch

MAARSO 2013

# Lahaystayaasha Waardiyeyaasha Ganjeelka

## Xadgudubyada Ka Dhanka ah Dadka Wadanka Gudihiisa Ku Barakacay ee Ku Sugan Muqdisho, Soomaaliya


**Xog Lasoo Koobay** ........ **1**

**Talooyinka Muhiimka ah** ........ **10**

Ku: Dowlada Qaran ee Soomaaliya ........ 10

**Talooyinka** ........ **11**

Ku socoto Dowlada Qaran ee Soomaaliya ........ 11

Dhaqangalinta Sharciga ........ 11

Gargaarka Bini'aadamnimo ........ 12

Heshiiska Xuquuqda Aadanaha ........ 13

Ku socoto Baarlamaanka Soomaaliya iyo Golaha Wasiirada ........ 14

Ku socoto Dowladaha Maraykanka, Ingiriiska, iyo Turkiga, iyo Midowga Yurub, Midowga Afrika iyo Uruka Iskaashiga Islaamka ........ 14

Ku socota Hay'ada Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Qaxootiga (UNHCR), UNICEF, iyo hay'adaha kale ee gargaarka ee fuliya una dhaqdhaqaaqa ilaalinta dadka, iyo xiriiriyaha Qaramada Midoobay ee arrimaha bini'aadamnimo iyo gargaarka ........ 16

Ku socoto Golaha Ammaanka ee QM ........ 16

Ku socoto Xoghayaha Guud ee QM ........ 17

Ku socoto Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha ........ 18

Ku socoto Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP) ........ 18

Ku socoto Afhayeenka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha ee Dadka Barakacay ........ 18

# Xog Lasoo Koobay

> Xerada Badbaado, waxaa un aad u qurxoon magaceeda oo qura, balse dadku aad ayay u naxariis daran yihiin. Dadka maamula xerada waa dabley isbahaysi la leh dowladda.... Waxay qaddariyaan qabiilkooda in ka badan inta ay qaddariyaan baniaadminimada. Annaga dan iyo heelo nagama lahan, sababtoo ah haddii ay og yihiin weerarada ka dhanka ah barakacayaasha, jawaab ayay ka bixin lahaayeen marka aannu usoo sheegno. Laakiin ma badbaadshaan marka dumarku u qeylyayaan cawimaad.
> —Sidaa waxaa tiri haweeney ka mid ah barakacayaasha oo 43-sano jir ah isla markaana daggan xerada Badbaado, bishii Siteembar 2011.

Dowladda cusub ee Soomaaliya waxay qorsheynaysaa in ay meelo kale u rarto tobanaan kunoo ah dad waddanka gudihiisa ku barakacay oo jooga Muqdisho sanadkaan. In badan oo ka mid ah dadkaan ayaa yimid caasimada dagaalku kala qoqobay sanadkii 2011 kadib markii ay dhacday macaluul ba'an oo abuurtay barakac baahsan. Macaluusha waxaa sababtay abaar ba'an, ammaan darro socota iyo dagaal, in laga horjoogsaday dadka rayidka ah cawimaad baniaadminimo, iyo "canshuur qaadid" siyaadeysay oo kooxda Islaamiyiinta ee hubeysan ee al-Shabaab ay ku soo rogtay ilaha dhaqaalaha iyo xoolaha nool ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya. Inkastoo aysan jirin tiro sax ah oo ku saabsan dadka abaartaasi dishay, hadana tobanaan kun oo qof ayaa la aaminsan yahay in ay u dhinteen cawaaqibkii ka dhashay macaluusha. Boqolaal kun oo qof ayaa u cararay wadamada dariska ah waxayna Qaramada Midoobay ku qiyaastay in in ka badan 75,000 oo barakacayaal ah ay yimaadeen Muqdisho muddo sagaal bilood ah gudahood sanadkii 2011. Baddalkii ay heli lahaayeen magangalyo iyo cawimaad baniaadminimo oo ay si dagdag ah ugu baahnaayeen, in badan oo dadka barakacayaasha ah ayaa waxay kala kulmeen gudaha Muqdisho jawi cadaawad iyo xadgudubyo ah.

Warbixintani waxay ku salaysan tahay cilmi barista wax ka badan hal sano, ayadoo ay ku jiraan 70 wareysi oo lala yeeshay dad barakacayaal ah oo cusub ama markaa yimid kuwaasoo ka soo barakacay koofurta iyo bartamaha Soomaaliya intii ay socotay macaluushii 2011-2012 iyo intii uu socday dagaal ka jiray qaar ka mid ah xerooyinka waaweyn ee barakacayaasha iyo meelo kale oo dadi dagan yahay oo kuyaala gudaha

Muqdisho. Waxay warbixintu faahfaahinaysaa xaalada dadka barakacayaasha ah ee ku sugan Muqdisho tan iyo markii macaluushu ay maraysay meeshii ugu sareysay bishii Luuliyo 2011 ilaa Nofeembar 2012.Waxayna ka waramaysaa xadgudubyadii soo wajahay dadkaa, kuwaasoo badanaa ay aamusiyaan kuwa ayagu ku howlan ka faaiideysiga nuglaanshahooda.

Intii waqtigaa lagu jiray oo dhan xubno ka tirsan beelaha soo barakacay ee Muqdisho ku sugan ayaa waxaa soo wajahay xadgudubyo xaquuqul insaanka ka dhan ah oo xunxun oo ay kujireen kufsi, garaacitaan, takoorid qabyaalad ku dhisan, helitaanka raashinka iyo hoyga oo la xaddiday, xaddidaadyo dhanka dhaqdhaqaaqa ah, iyo aar goosiyo lagu sameynayay mar kasta oo ay isku dayaan in ay ka hortagaan dhaqan xumada lagula kacaayay. Xad gudubyadii ugu xumaa waxaa gaystay maleeshiyaad kala duwan iyo qaar ka tirsan ciidamada ammaanka, oo badanaa taabacsan dowladda, kuwaasoo ka howl galayay xerooyinka gudahooda ama meelo u dhow iyo dagaanada loogu tala galay barakacayaasha. Sida caadiga ah maleeshiyaadkaas waxaa lala xiriirshay ama xukumayay maareeyeyaasha, ama “waardiyeyaasha ganjeelka” waa sida loo yaqaanee, ee xerada barakacayaasha.

Masiirka barakacayaasha waxaa uu badanaa ku jiraa gacmaha waardiyeyaasha ganjeelka.Maadaama ay ayagu yihiin “dadka haya”, waardiyeyaasha ganjeelkawaxay go’aamiyaan meesha ay dagayaan, sida ay meelahaas ku tagayaan barakacayaashu iyo badanaa awoodooda ay ku helayaan gargaar baniaadminimo. Waardiyeyaasha ganjeelku waxay badanaa ka soo jeedaan qabiil awood leh oo tiro badan oo maxali ah; oo mar mar waxaa lala xiriirshaa dowladaha hoose ama maleeshiyo beeleedyo ayagu sida cad bixiya ammaanka balse xaqiiqdii maamula xerooyinka.

Dhibaatooyinka badan ee ka jira xerooyinka mindhaa dhibaatada ugu dhibka badan waa carqalada dhanka galmada ah. Dumarka barakacayaasha ah iyo gabdhaha waxaa soo wajaha halis weyn oo dhanka kufsiga ah Muqdisho gudaheeda. Waxay u sheegeen Human Rights Watch in kufsigu caadiyan ka dhici jiray habeenkii aqalada. Xataa Badbaado, oo ah mid ka mid ah xerooyinka barakacayaasha ee dowladu maamusho ee kuyaala caasimada, ma ahayn mid badbaada. Dhowr dumar ah ayaa sheegay in rag hubeysani ay kufsadeen raggaas oo ku labisnaa darees ciidan, kuwaasoo qaarkood lagu tilmaamay in ay ahaayeen askar dowladeed. Dhibaneyaal badan oo loo geystay carqalad dhanka galmada ah uma soo sheegaan wixii qabsaday hayadaha dowliga ah sababtoo ah waxay ka baqaan in

aargoosi dadka ka dambeeya dhibaatooyinka loo geysto ay kula kacaan, waxay sidoo kale ka digtoon yihiin in bulshadu ku ceebeyso wixii ku dhacay, waxayna kalsooni aad u yar ku qabaan in hayadaha dowliga ah ay jawaab ka bixin doonaan wixii loo geystay. Aabaha haweeney da' yar oo afar nin oo ku labisnaa dareeska militariga dowlada ay kufsadeen ayaa sheegay sidaan: "Cidna halkaan kama naqaano, Muqdisho waan ku cusub nahay. Marka anagu ma anaan isku dayin inaan aadno caddaalada, sababtoo ah waxaa na dhibayay taliyaha markii gabadhayda la kufsaday. Marka sidee ayaan halkaan qof u aamini karaa? Waxaanu ku qasbanahay inaan aamusno." Kuwii hadla waxay un heli karaan xulashooyin yar oo loogu tala galay badbaadin, cawimaad dhanka caafimaadka ah, ama magdhaw.

Ammaanka xerada, oo badanaa ku xiran dabley dowlada taabacsan, si joogto ah ayaa loogu walcinayay hanjabaadyo iyo weeraro ka dhan ah dadka barakacayaasha ah, kuwaasoo carruuri ay kujiraan. Waxaa si gaar ah khatar u ah inta raashin qeybinta lagu jiro ama inta baaritaanada teendhooyinka hayadaha gargaarka baniaadminimda ay bixiyeen la wado. Oo cadaadis dhulka iyo hantida saaran oo sii kordhaya oo ka jira Muqdisho dartii, beelo muddo dheer barakacsanaa iyo weliba beelo ayagu dhawaan soo barakacay ayaa waxay si sii kordheysa u noqonayaan kuwo u nugul raritaan qasab ah oo laga rarayo meelaha ay daggan yihiin.

Sheekooyinka dadka ka soo barakacay Baay, Bakool iyo gobolada Shabeelooyinka oo kuyaala koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, kuwaasoo asaas ahaan ka soo jeeda beesha Raxanweyn iyo Bantu oo ah dad tiro yar, waxay muujinayaan in beelahaasi ay si gaar ah ugu nugul yihiin xadgudubyada. Waardiyeyaasha Ganjeelka iyo maleeshiyadooda ayaa waxay ula dhaqmaan sidii muwaadiniin heerka dabaqada labaad ah waxayna kula kacaan cadaadin qaabab badan oo kala duwan leh, kuwaasoo uu ku jiro xadgudub hadal iyo toos in loo weeraro ah.

Bulshooyinkaa barakacsan ayaa waxaa ka soo wajaha culeysyo xunxun sidii ay ku heli lahaayeen raashin ku filan iyo hoy. Waardiyeyaasha Ganjeelka iyo maleeshiyaadka ayaa adeegsada habab kala duwan si ay u weeciyaan ama u xadaan raashinka gargaarka ah inta qeybinta raashinku socoto iyo markii raashin qeybintu dhammaataba. Qaar ka mid ah dadka barakacayaasha ah ayaa waxaa qasab ku noqotay in ay bilaabaan tuugsi maadaama aysan heli karayn raashin.

Waardiyeyaasha Ganjeelka iyo maleeshiyaadku waxay uga faaiideystaan bulshooyinka soo barakacay siyaabo kale. Waxay ugu hanjabaan in ay ka qaadan doonaan teendhooyinka hayadaha gargaarka baniaadminimo ee caalamiga ah ay siiyeen barakacayaasha, waxay sidoo kale xaddidaan dhaqdhaqaaqooda, oo ay ku jirto awooda ay u leeyihiin in ay ka tagaan meelaha ay daggan yihiin ama xerooyinka. Dhowr haween ah oo barakacayaal ah ayaa sheegay in ay dareemeen sidii in ay u yihiin lahaysteyaal Waardiyeyaasha Ganjeelka sida haweeney 40 sano jir ahba ay tiri:

> Haddii aanu ayada [haweeney ka tirsan Waardiyeyaasha Ganjeelka] siinno teendhooyinka wax kale oo noo baddala ma heleyno.Hadii aannu isku dayno inaan xerada ka tagno waxay naga qaadaneysaa teendhooyinka. Anagu ma haysano bac, ma haysano gabbaad kale, mana haysano meel aan seexano. Marka tan iyo inta nalaka badbaadinaayo waxaa qasab nagu ah inaan halkaa joogno sidii la haysteyaal oo kale.

Barakacayaasha, gaar ahaana raggu waxay si ku celcelis ah isugu dayeen inay dareenkooda ku aaddan xadgudubyada muujiyaan ayagoo u muujinaya waardiyeyaasha ganjeelka ama hayadaha dowlada ee hoose ama kuwa dhexe. Marar aad u badan ayay ka baaqsadeen inay ballankii ay qaadeen ay ka soo baxaan, ama waxaaba ka sii daran, in barakacayaasha intaa kadib si aan sabab lahayn booliska maxaliga ah ay u xireen ama ay garaaceen ama maleeshiyo ay garaacday maadaama ay isku dayeen in ay dareenkooda muujiyaan. Barakac kale ayaa in badan wuxuu ahaa xulashada kaliya ee la gudboon dadka soo barakacay ee doonaya inay naftooda ka badbbaadshaan carqalad.

Jawiga dhaqaale, midka bulsho, iyo kan siyaasadeed ee ka jiray gudaha Muqdisho waqtigii macaluusha wuxuu gacan ka geystay xadgudubyada ka dhanka ah barakacayaasha. Kooxda Islaamiyiinta ee hubeysan ee al-Shabaab ka bixitaankeedii ay bishii Agoosto 2011 ka baxday halkaa wuxuu abuuray marnaan ammaan oo Dowladii Federaalka Kumeelgaarka Soomaaliyeed (DFK) ciidamadeedii ay si baahsan u awoodi waayeen in ay buuxshaan. Marnaanshahaasi wuxuu saamaxay in maleeshiyaadka beelaha iyo maleeshiyaad madax bannaan ay dib u soo baxaan, ayagoo in badan oo ka mid ah si toos ah ama si aan toos ahayn loola xiriirshay guddoomiyeyaal degmooyin oo awoodoodu isa sii tareysay isla markaana aad u awood badnaa iyo saraakiil maxali ah oo soo if baxay si ay ula wareegaan maamulka dhowr degmo oo kuyaala Muqdisho iyo dhaqaalahooda.

Dadka wadanka gudihiisa ku bara kacay waxaa difaacaya sharci caalami ah—sharciga baniaadminimada ee caalamiga ah waqtiga dagaaladu ay socdaan iyo sharciga xaquuqul insaanka ee caalamiga ah waqti walba. Badbaadinta dowladuhu ugu tala galaan barakacayaasha waxaa lagu soo koobay Mabaadiida Wax Hagaya ee ku saabsan Barakaca Gudaha ee Qaramada Midoobay ("Mabaadiida Wax Hagaya ee QM"), kuwaasoo wax ka qabta badbaadada iyo helitaanka cawimaad baniaadminimo labadaba, iyo weliba arimo kale. Waxaa ahmiyad soo ifbaxaysa u leh barakacayaasha kusugan Afrika Heshiiskii Caalamiga ahaa ee Midowga Afrika ee loogu tala galay Badbaadinta iyo Caawinta Dadka Wadamadooda Gudahooda Ku Bara Kacay ee Afrika (Heshiiskii Kampala), kaasoo dhaqan gal noqday Diseembar 6, 2012. Heshiiskii Kampala wuxuu bixinayaa sharraxaad guud oo ku saabsan xaquuqda dadka wadamadooda gudahooda ku barakacay iyo waajibaadka dowladaha iyo ka qeybgaleyaasha aan dowliga ahayn ka saaran arinkaa. Soomaaliya waxay ka mid ahayd wadamadii saxiixay heshiiskaa laakiin wali qeyb kama ahan heshiiska.

Xadgudubyo ka dhan ah barakacayaasha ayaa dhacay marka si guud looga hadlo isla xisaabtan la'aanta xadgudubyada ka dhanka ah sharciga xaquuqul insaanka ee caalamiga ah iyo sharciga baniaadminimada. Soomaaliya waxaa la dagay xadgudubyo badan oo ka dhan ah sharciga baniaadminimada ee caalamiga ah, kuwaasoo ay ku jiraan weeraro kas ah oo aan loo aaba yeelin oo lagu qaaday rayid, dad loo geystay dil ayagoon sharciga la marin, kufsi, iyo bililiqeysi. Helitaanka cawimaad baniaadminimo, kaasoo lagu badbaadsho sharciga baniaadminimada ee caalamiga ah gudihiisa, ayaa wuxuu ahaa dhib xun, gaar ahaana gudaha meelaha al-Shabaab ay ka taliyeen.

Dadkii ka masuulka ahaa xadgudubyada waxaa adag in la ogaado, gaar ahaana maadaama ay jireen kooxo badan oo hubeysan oo firfircooni ku lahaa gudaha Muqdisho iyo in si fudud lagu heli karayay durba dareeska militariga. Dadka barakacay ee Human Rights Watch u sheegay kufsiga iyo xadgudubyo kale waxay marmar sheegeen in askar dowladeed ay ka dambeeyeen. Dad kale oo ka qeyb qaatay waxaa ka mid ahaa maleeshiyo lala xiriirshay guddoomiyeyaal dagmooyin iyo saraakiil kale oo maxali ah, oo qaarkood lagu dhafay ciidamada dowlada. Waardiyeyaasha ganjeelka iyo maleeshiyaadkooda maxaliga ah waxay ku xadgudbeen isla markaana barakiciyeen dad ku jiray xerooyin ay maamulaan ayagoo xadayay raashinkooda oo xadidayay dhaqdhaqaaqooda.

DFK, oo dhisnayd ilaa laga gaaro bishii Agoosto 2012, waxay aad ugu guul darreysatay inay xataa bixiso badbaadooyinka ugu asaasisan iyo cawimaadii la doonayay in la siiyo dadka

wadanka gudihiisa ku barakacay ee ku sugnaa meelaha ay ka talin jirtay intii lagu jiray xiligii macaluusha iyo ka dambe.Saraakiisha DFK waxay badanaa inkiri jireen xadgudubyada kufsigu ka midka yahay in ay xataa dhacayeen. Sarkaal ka tirsan QM ayaa ku tilmaamay inkiraada hayadaha dowliga ah ee lidiga ku ah in kufsi dhacaayay inay tahay caqabadda ugu weyn ee hor taagan wax ka qabashada xadgudubka. Taageerada sii kordheysa ee loogu tala galay caafimaad guud iyo adeegyo kale oo loogu tala galay dadka loo geysto carqalada dhanka galmada ah waa in ay ugu horeyso waxyaabaha haatan mudnaanta deeqbixiyeyaashu ay siinayaan.

DFK lama xisaabtamin xubnaha xadgudubka geysanayay ee ciidamadeeda ammaanka iyo maleeshiyaadka taabacsanaa. Inkastoo dadka barakacsan ay ahaayeen dad ka mid ah kuwa ugu tiro badan isla markaana ugu nugul meelaha Muqdisho ka tirsan ee dowladu ka talinaysay sanadkii 2011 iyo 2012, DFK waxay qaaday tillaabooyin yar oo wax looga qabanayay baahidooda.Laba guddoomiye degmooyin ayaa waxaa maxkamad militari ay ku qaaday dambi ah in ay bililiqeysteen raashin gargaar ah, laakiin madaxweynihii waqtigaa-Shariif Sheekh Axmed ayaa durbadiiba cafis u fidiyay.

Hayadaha baniaadminimada iyo ururada iyo deeq bixiyeyaasha ayaga taageera waxaa muddo dheer soo wajahday xaalad ammaan darro ah oo xujo miiran ah iyo caqabado kale oo liddi ku ah dadaaladooda ay ku bixinayaan cawimaadda ay siiyaan dadka dhibaatadu ku haysato gudaha Soomaaliya. Intii macaluushu jirtay waxaa jiray cadaadis weyn oo durba lagu ballaarinaayo barnaamijyada cawimaada ee Muqdisho gudaheeda ah.Qulqul cusub oo lama filaan ah oo ah ururo samafal oo cusub, oo qaarkood waayo-aragnimo yar u lahaa ka shaqeynta gudaha Soomaaliya, ayaa wuxuu sababay barnaamijyo aan qiimeyn dhibaatooyinka haystay bulshooyinka soo barakacay iyo dhibaatooyinka qalafsanaa ee bixinta cawimaada ayadoo la adeegsanayo saraakiil maxali ah iyo waardiyeyaal ganjeel.

Natiijada ayaa waxay noqotay barnaamijyo mararka qaarkood xoojinayay awooda saraakiil wax ku xadgudba iyo waardiyeyaal ganjeel baddalkii la caawin lahaa dadka ay doonayeen in ay caawiyaan. Dhibaatooyinkaa ayaa waxaa uga sii daray xaalada ammaanka, oo ku qasabtay hayadaha QM iyo ururada kale in ay ka shaqeeyaan meel fog iyo in aysan samayn kormeerka ku habboon barnaamijyada noocaas ah. Wax ka qabashada arimahaa sidoo kale uma muuqato in ay ahayd mudnaan.

Inkastoo macaluushu ay si rasmi ah u dhammaatay, dagaalkii iyo ammaan darradii way kasii jiraan inta badan ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya. Xataa hadii qaar barakacayaasha ay doortaan inay guryahoodii ku laabtaan bilaha soo socda, bulshooyinka soo barakacay waxay sii ahaan doonaan qeyb weyn oo ka mid ah dadka Muqdisho sanado dhowr ah mustaqbalka. Dhammaadka macaluusha iyo nabadda taagta daran ee haatan ka jirta Muqdisho waxay fursad siinayaan in ay si sidii hore ka wanaagsan wadanka u yimaadaan iyo isla xisaabtan loogu tala galay dhammaan ka qeyb galeyaasha caalamiga ah ee ku howlan arimaha Soomaaliya, taasoo ah fursad ay tahay in aan la lumin.

Dowlada cusub ee Soomaaliya ee la hirgaliyay dhammaadkii waqtigii ku meelgaarka bishii Agoosto 2012waxaa saran xilka asaasiga ah ee lagu bixinaayo badbaado loogu tala galay barakacayaasha—iyo inta kale ee ah dadka Soomaaliyeed. U muujinta Soomaalida in dowlada cusub, si ka duwan kuwii ka horeeyay, ay awood u leedahay in ay xaqiijiso xaquuqda dadka hoos imaada maamulkeeda waxay tijaabo muhiim ah u tahay aaminaada lagu qabo.Dowladu waxay qorsheynaysaa in ay meelo kale u rarto barakacayaasha kusugan Muqdisho. Tani waxay noqon doontaa tillaabo wanaagsan haddii barakacayaashu ay helayaan badbaado intii hore ka badan iyo cawimaad intii hore ka badan oo ay ka helaan goobaha la qorsheeyay in dib loo dajiyo. Dowladdu waxay si cad u qaadi doontaa waajibka ah in wax laga qabto dareenada waaweyn ee ku saabsan helitaanka badbaadada, booliis kufilan oo wax ku ool ah, iyo cawimaad laga helo goobaha cusub ka hor inta dib u dajinta noocaas ah aysan bilaaban Deeq bixiyeyaasha taageeraya booliska Soomaaliya waa in ay mudnaanta siiyaan shaqaaleynta ciidan boolis oo howl kar ah isla markaana lala xisaabtami karo kuwaasoo loogu tala galay goobaha dib loo dajinayo barakacayaasha. Dowladdu waa in ay xaqiijiso in dadka soo barakacay ay si buuxda uga qeyb qaataan qorsheynta iyo maareynta hannaanka dib u dejinta oo waa in ay samayso xulashooyin xor ah oo isla markaana waxgal ah.

Xaqiijinta isla xisaabtanka ciidamada dowlada iyo kooxaha hubeysan ee aan dowlada ka tirsanayn ayadoo ay tahay in lagula xisaabtamo xadgudubyada ay sameeyaan ayaa waxay sidoo kale tahay arin muhiim ah. Waxaa jiray iminkana jira calaamado wanaagsan: madaxweynaha cusub, Xassan Sheekh Maxamuud, wuxuu si cad u sheegay bishii Nofeembar 2012 in lala xisaabtami doono xubnaha ciidamada ammaanka ee masuulka ka ah kufsiga. Si kastaba ha ahaatee, booliska xiritaankii iyo dacwad ku soo oogiddii bishii Janaayo 2013 ay u geysteen haweeney barakacayaasha ka mid ah iyo saxafi ay uga warantay kufsiga ay sheeganaysay in qaar ka mid ah ciidamada ammaanku ay u geysteen,

waxay tilmaamaysaa rabitaan intii hore ka weyn oo loo qabo in la badbaadsho dadka ka dambeeya carqalada dhanka galmada ah marka loo barbar dhigo in wax laga qabto dhibaatada xun. Shaqada madaxweynaha ee ku aaddan kiiskaan—oo labadaa eedeysane keentay in lagu xukumo min hal sano oo xarig ah, inkastoo xukunkii haweeneyda mar dambe la dhaafay—waxay sigeysaa inay hoos u dhigto ajendaha isbadalada dowladu doonayso inay samayso.

Taagerayaasha caalamiga ah ee dowlada cusub ee Soomaaliya waxay sheegayaan in dowladda cusub ay u taagantahay rajo dhab ah oo mustaqbalka laga qabo. Balse wax badan waxay ku xiran yihiin awoodda dowladda ee ah in ay soo afjarto isla xisaabtan la'aanta ka jirta dhinaca xadagudubyada iyo in ay hirgaliso xukunka sharciga iyo ixtiraamida xuquuqda asaasiga ah.

Deeqbixiyayaasha caalamiga ah waa in ay cadeeyaan in ay muhiim tahay isla xisaabtanka dhinaca xadgudbyada daran ah oo ay ka mid yihiin kuwa ay geysteen xogaga dowladda. Si taa loo gaaro, waa in dowladda Soomaaliya iyo deeq bixiyayaasheeda caalamiga ah ay taageeraan tallaabooyinka muddada dhow iyo kuwa muddada fog si wax looga qabto xadgudubyada ba'an ee horay u dhacay iyo kuwa haatan socda ee xuquuqda aadanaha.

Waxaa jirta baahi deg deg ah oo ah in la horumariyo la socodka iyo ka warbixinta xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha, walaaca ku aaddan difaacidda dhibanayaasha iyo weecinta caawimaadda. Waxaa muhiim ah in la taageero ballaarinta la socodka xuquuqda aaddanaha iyo ka war bixinta uu wado xafiiska QM ee xuquuqda aadanaha (OHCHR). Waxaa haatan fursad wannaagsan ah hannaanka dib u eegida ee QM ay ka wado Soomaaliya oo looga faa'ideysan karo in xaqiiq laga dhigo ballaarinta howsha xafiiskan.Deeq bixiyayaashu waa in ay sidoo kale kordhiyaan taageerada ay siiyaan cutubka maareynta halista ee QM oo waa in ay ku dhiirigaliyaan hay'adaha QM iyo hay'adaha aan dowliga ahayn in ay la shaqeeyaan cutubkan.Hay'adaha QM ee leh ogolaanshaha babaadinta waa in ay mudnaanta siiyaan barnaamijyada khuseeya baahida barakacayaasha. Waa in Xafiiska dagaanka ah ee isku duwaha gargaarka QM uu la kaashadaa dowlada Soomaaliya iyo hay'adaha kale, howl laga fulinayo Muqdisho oo dhan taas oo ku saabsan ka war bixinta xogta ku saabsan barakacayaasha si loo aqoonsado isla markaana si sidii hore ka wanaagsan wax looga qabto baahidooda ka hor inta aanan mustaqbalka meelo kale loo rarin.

Ugu dambeyntii, in wax laga qabto xadgudbyada xuquuqda aadanaha ee loo geysto barakacayaasha iyo si guud bulshooyinka Soomaalida ayaa micnaheedu waxay tahay in wax laga qabanayo isla xisaabtan la'aanta mudada dheer soo taagneyd. Waa in dowladda Soomaaliya iyo taageerayaasheeda caalamiga ah ay ku baaqaan in la sameeyo guddi xaqiiqa raadin ah oo ka socda QM-ama si la mid ah siyaabo kale oo lagu baari karo laguna diiwaangalin karo dambiyada ba'an ee ka dhacay Soomaaliya-oo waa in ay isla markaa iyada ah soo jeediyaan tallaabooyinka lagu horumarinkaro isla xisaabtanka.

# Talooyinka Muhiimka ah

## Ku: Dowlada Qaran ee Soomaaliya

- Waa in la qaado dhamaan tallaabooyinka muhiimka ah si loo xaqiijiyo in la howl galiyo boolis tababaran, shaqa aqoon ah, ka soo bixi kara howshooda kuwaas oo la geynayo meelaha ay ku nool yihiin bulshooyinka soo barakacay ee ku sugan Muqdsiho iyo meelaha kale ee ay dowladu gacanta ku hayso oo ay ka mid yihiin goobaha cusub ee dib loo dajinaayo dadkii barakacay, iyadoo booliskuna ay mudnaan gaar ah siinayaan baahida ammaan ee dumarka iyo gabdhaha.
- Waa in si ku habboon loo mariyo ciqaab edbin ah ama ay dacwo ugu soo oogto xubnaha ka tirsan militariga, booliska, kooxaha aan dowlada ka tirsanayn ee hubaysan iyo sarakiisha dowlada ee mas'uulka ka ah xadgubyada xaquuqul insaanka ee daran oo ay ku jiraan xadgudubyada loo geystay dadka barakacay iyo si xun u maamulida gargaarka baniaadanimo.
- Waa in ay bilowdaa iyadoo gacan ka helayso Isku Duwaha Dagaanka ah ee Gargaarka Baniaadanimo ee Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale ee caalamiga ah howlgal lagu diiwaan galinayo dadka barakacay ee Muqdisho kunool si loo qiimeeyo baahida ay u qabaan badbaado.
- Waa in la taageero ballaarinta xafiiska QM u qaabilsan arrimaha xuquuqda aadnaha ee ka tirsan howgalka QM ee cusub.

Hay'adaha QM, wakiilka QM ee isku duwaha gargaarka baniaadanimo, xafiiska QM iyo deeq bixiyayaasha sida Maraykanka, Ingiriiska, Midowga Yurub, Turkiga, Midowga Afrika, iyo Ururka Iskaashiga Islaamka waa in ay si cad u qeexaan oo ay taageeraan tallaabooyinka kor lagu soo xusay.

# Talooyinka

## Ku socoto Dowlada Qaran ee Soomaaliya

### *Dhaqangalinta Sharciga*

- Waa in la xaqiijiyaa in la dhaqanka shacabka uu noqdo mid si buuxda gacanta loogu hayo, shacabka oo barakacayaashu ku jiraan, oo waa in loola dhaqmo si waafaqsan sida uu qorayo shirciga xuquuqul insaanka caalamiga ah iyo qaanuunka bini aadanimada, oo uu ku jiro heshiiska Midowga Afrika ee Dhowrista iyo Caawinta dadka ku barakacay wadamdooda gudahooda ee qaarada Afrika.
- Waa in la qaado dhammaan tallaabooyinka muhiimka ah si loo xaqiijiyo in la howlgaliyo boolis tababaran, shaqa-aqoon ah, ka soo bixi kara howshooda si loo badbaadiyo bulshooyinka soo barakacay ee ku sugan Muqdsiho, oo ay ka mid yihiin goobaha cusub ee dib loo dajinaayo iyo meelaha kale ee ay dowladu gacanta ku hayso. Waa in mudnaan gaar ah la siiyo baahida ammaanka ee dumarka iyo gabdhaha, sida:
    - In la shaqaaleeyo saraakiil haween ah oo boolis ah oo dheeraad ah si ay udub dhexaad ugu noqdaan xarumaha booliska;
    - In loo tababaro booliska iyo ciidamada kale ee ammaanka sidii ay uga jawaab celin lahaayeen xadgudubka kufsiga;
    - In la dhaqan galiyo tallaabooyinka ama qaababka si loo dhowro qarsoonida dadka soo sheegaya gaboodfallada kufsiga; oo
    - Ka dib markii la dhaqan galiyo tallaabooyinkaa kor lagu xusay, waa in la faro booliska inay qabtaan wacyigalin fogaan gaar ah oo guud si loo xoojiyo aaminaada lagu qabo booliska, si loosoo tabiyo kiisas badan oo ah xadgudubyada kufsiga iyo dambiyada kalaba.
- Waa in si ku habboon loo mariyo ciqaab edbin ah ama ay dacwo ugu soo oogto xubnaha ka tirsan Ciidamada Qalabka sida ee Qaranka Soomaaaliya, Ciidamada Booliska ee Qaranka Soomaaliyeed, kooxaha aan dowlda ka tirsaneyn ee hubaysan iyo sarakiisha dowlada ee mas'uulka ka ah xadgubyada xuquuqda aadanaha ee daran oo ay ku jiraan xadgudubyada loo geystay dadka soo barakacay iyo si xun u maamulida gargaarka bani aadanimo.

- Saraakiisha dowlada iyo kuwa militariga ee heerarka ugu sareeya waa in ay soo saaraan cadeymo guud oo ku wajahan Ciidamada Qalabka sida ee Qaranka Soomaaliya iyo Ciidamada Booliska Soomaaliyeed cadeymahaas oo ku saabsan in xadgudubyada ka dhanka ah barakacayaasha dadkii ku kaca si ku habboon loo ciqaabi doono.
- In la hirgaliyo qaabab kala shaandheyn ah oo waadax ah oo lagu ogaado isla markaana meesha looga saarayo inta uu socdo hannaanka shaqaalaynta CiidamadaQalabka sida ee Qaranka Soomaaliya iyo Ciidamada Booliska Qaranka Soomaaliya shakhsiyaad ayagu mas'uul ka ah xadgudubyada aadka u daran.
- Waa in la xaqiijiyo in saraakiisha boolisku ay helaan tababar habboon oo ku saabsan xuquuqul insaanka, oo ay ku jiraan xuquuqda gaarka ah ee barakacayaasha, ayadoo laga jawaabayo xadgudubyada kufsiga, iyo waxyaabaha kale ee xalka degdega ah u baahan.
- In la baaro maxkamadeyntii bishii Janaayo 2013kii ee haweeneey sheegatay in ay kufsadeen ciidamada ammaanka iyo wariyihii wareystay iyada, taasoo looga gol leeyahay in lagu edbiyo ama lagu ashtakeeyo dhammaan saraakiishii mas'uulka ka ahayd xadgudubyada.
- Wasaarada Horumarinta iyo Arrimaha Bulshada oo la shaqenaysa xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, waa in ay sameyso siyaasado cad cad oo dowladu leedahay oo la aamini karo iyo jawaabo ay tahay in laga bixiyo carqalada dhanka kufsiga ah.

*Gargaarka Bini'aadamnimo*

- Waa in la bilaabo iyadoo gacan laga helayo xiriiriyaha Qaramada Midoobay ee gargaarka iyo hay'adaha caalamiga ah, si loo sameeyo howlgal lagu diiwaangalinayo bulshooyinka ku barakacay Muqdisho si loo qiimeeyo baahidooda ammaanka.
- In loo fududeeyo oo aan la carqaladeyn hay'adaha gargaarka inay la xiriiraan dadka shacabka ah ee khatarta ku jira, loona xaqiijiyo in howsha gargaarka ay u wadan karaan si xor ka ah dhibaateyn iyo faragalin.
- In la xaqiijiyo in dib u dejinkasta ee soo socota ee loo sameynayo dadka ku soo barakacay magaalada Muqdisho ama meel kalaba mid iskaa wax u qabso ah, iyo in barakacayaasha laf ahaantooda lala tashado inta ay howshu socoto, oo waa in si buuxda loogu wargaliyo sababta loogu sameynayo dib u dejinta, waana in loo

diyaariyaa ammaanka iyo gargaarka ay u baahan yihiin markii la geeyo goobaha cusub ee dib u dejinta loogu sameynayo.

- Waa in la xaqiijiyo in hay'adaha gargaarka bini'aadamnimo ee Soomaalida iyo hay'adaha xuquuqul insaanka lagala tashado oo lagu daro go'aamada la xiriira qorshaha dib u dejinta bulshada soo barakacday.

*Heshiiska Xuquuqda Aadanaha*

- Waa in la taageero ballaarinta xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan xuquuqda bini'aadamka ee ka tirsan howlgalka cusub ee Qaramada Midoobay.
- Waa in la taageero dadaalada hay'adaha gargaarka ee Qaramada Midoobay si loo bilaabo hannaan horumarsan oo lagula soconayo loogana jawaabayo xadgudubyada kufsiga ee lagula kaco barakacayaasha iyo xadgudubyada kalaba.
- Waa in gacan loo fidhiyaa dhammaan laamaha gaarka ah ee Qaramada Midoobay oo uu ku jiro Afhayeenka gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee xuquuqda aadanada ee barakacayaasha iyo u qaabilsanaha gaarka ah ee Xoghayaha Guud xadgudubyada kufsiga ee ka dhasha isku dhacyada, si uu u booqdo Soomaaliya.
- Waa in la taageero dhaqangalinta qaanuunkii Rome ee Maxkamada Caalamiga ah ee Dambiyada; heshiiska Midowga Afrika ee dhowrista iyo caawinta dadka ku barakacay gudaha wadamadooda ee qaarada Afrika; heshiiska xuquuqda dhallaanka iyo saddexda hab maamuus ee uu qofka wax ku kala dooran karo; dhamaan heshiisyada ku saabsan baabi'inta, faquuqida iyo takooridda haweenka; iyo hab maamuuska axdiga Afrika ee bini'aadamka iyo xuquuqda dadka ee xaqa haweenka ee Qaarada Afrika("Dhaqankii Maputo").
- In la taageero in la abuuro guddi Qaramada Midoobay u qaabilsan xaqiiqo raadin—ama is barbar dhigis, ama isku habboonayn—si loo qoro ama loo diiwaan galiyo oo loo dajiyo dambiyada caalamiga ah ee khatarta ah ee lagu galay gudaha Soomaaliya iyo in talo muhiim ah laga bixiyo tallaabooyinka lagu horumarin karo isla xisaabtanka.
- In la amro go'aan lagu joojinayo isticmaalka xukunka dilka si dib loogu eego mowqifka dalka ee ku aaddan in meesha laga saaro oo la tirtiro xukunka dilka.

## Ku socoto Baarlamaanka Soomaaliya iyo Golaha Wasiirada

- Waa in la dhiso guddi si degdeg ah u daraaseeya oo talo bixin muhiim ah ka dhiibta hub ka dhigista iyo ka ruqseynta shaqada maleeshiyaadka Muqdisho iyo meelaha kale ee ay maamusho dowlada.
- Waa in loo coddeeyo dhaqangalinta iyo meel marinta heshiisyada xuquuqda aadanaha ee kor lagu soo xusay.

## Ku socoto Dowladaha Maraykanka, Ingiriiska, iyo Turkiga, iyo Midowga Yurub, Midowga Afrika iyo Uruka Iskaashiga Islaamka

- In loogu yeero dowlada Soomaaliya inay qaado tallaabooyin ay ku horumarinayso ilaalinta barakacayaasha iyo inay la xisaabtanto xubnaha ka tirsan ciidamada ammaanka iyo saraakiisha kale ee dowlada ee mas'uulka ka ah xadgudubyada loo geysto barakacayaasha.
- In la taageero dadaalada loogu diyaarinayo tababar ku habboon xubnaha ciidamada hubeysan ee Soomaaliya iyo boolis ka shaqeeya xuquuqda bini'aadamka, oo ay ku jiraan barakacayaasha kana jawaaba gaboodfallada kufsiga. Waana in la xaqiijiyaa in mudnaanta la siiyo in loo daabulo ciidamo boolis ah oo tababaran oo howl kar ah goobaha dib u dejinta loogu sameeyay barakacayaasha.
- Taageerida in OHCHR si ballaaran loogu daro qaab dhismeedka cusub ee Qaramada Midoobay oo wata ilo dhaqaale oo ku filan, ayna ka mid tahay shaqaale khibrad u leh xadgudubyada kufsiga, awoodna u leh inay si wax ku ool ah ay u soo aruuriyaan xogta xuquuqda aadanaha, ayna soo tabiyaan.
- In lagu booriyo dowlada Soomaaliya inay hagaajiso oo ay horumariso sida ay booliska uga jawaabayaan xadgudubyada faraxumeynta ee ku saleysan jinsiga, sida lagu qeexay talobixinta muhiimka ah ee sare.
- In la xaqiijiyo in dib udejinkasta ee mustaqbalka loo sameynayo dadka ku barakacay Muqdisho ama meelaha kale ee ay maamusho dowlada ay noqotaa mid iskaa wax u qabso ah, waana in la geeyo ciidamo boolis ah oo masuuliyad leh oo gaar u ah goobaha dib udejinta loogu sameeyay barakacayaasha.
- In loogu baaqo dowlada Soomaaliya, oo ay ku jirto Wasaarada Horumarinta iyo Arrimaha Bulshada, in ay la shaqeeyaan xafiiska Ra'iisul Wasaaraha si loo

sameeyo barnaamijyo cad cad oo lagu kalsoonaan karo oo jawaab u noqon kara xadgudubyada faraxumeynta ama kufsiga.

- In lagu dhiirigaliyo hay'addaha Qaramada Midoobay lana siiyo ballan qaad ah inay u sheegi karaan heshiisyada waaxda maamulka khataraha ee Qaramada Midoobay, iyadoo la raacayo talo bixintii muhiimka ahayd ee soo saartay kooxda dabagalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya iyo Eritrea oo ah in xogta la wadaagayo ay ka mid noqoto heshiisyada hoose iyo faafaahinta dadka fulinayaba.
- Waa in la taageero waaxda maamulka khataraha ee Qaramada Midoobay si ay u xaqiijiso inay hayso ilihii loo baahnaa si ay si dhab ah ugu howlgasho.
- In la helo ilaalo madax bannaan oo qaada mas'uuliyada, gacana ka geysata sidii loo yarayn lahaa si khaldan u isticmaalka gargaarka.
- In la taageero in la sameeyo qaab kala shaandheyn cad ah oo lagu soo xusho ama loogu diido shakhsiyaadka mas'uulka ka ah xadgudubyada aadka u daran inta ay socoto howsha shaqaalaha loogu qoraayo ciidama qalabka-sida ee qaranka Soomaaliya iyo ciidamada booliska qaranka Soomaaliya.
- In la xanibo dhaqaalaha iyo gargaarka kale ee la siiyo waaxyaha ciidamada militariga iyo booliska ku lugta leh xadgudubyo khatar ah oo loo gaysto aadanaha, oo uu ku jiro xadgudubka kufsiga.
- In la siiyo taageerada ku habboon dowlada Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay si loo sameeyo howlgal lagu diiwaangalinayo bulshooyinka ku barakacay Muqdisho si loo qiimeeyo baahidooda ammaanka.
- In la kordhiyo taageerada la siiyo qeybta ama waaxda ilaalinta dadka ee Soomaaliya iyadoo la xaqiijinayo in la dhowro qeybaha muhiimka ah ee loo danleeyahay ee ku aaddan dadaalada la isu kaashaday ee soo socda, iyo in la qaato tallaabooyinka kale ee ku habboon.
- In la taageero horumarada lagu sameynayo hannaanka la socodka iyo tabinta ilaalada dadka iyadoo la dhowrayo qeybaha muhiimka ah.
- In si muuqata loo taageero in meesha laga saaro caqabadaha xorriyada iyo in la dhiirigaliyo isla xisaabtanka gudaha Soomaaliya, taasoo uu ku jiro guddiga Qaramada Midoobay ee baaritaanada xaqiiqada—ama wax la barbar dhigi karo, ama hab ku habboon—si loo qoro ama loo diiwaan galiyo oo loo dajiyo dambiyada caalamiga ah ee khatarta ah ee lagu galay gudaha Soomaaliya iyo in talo muhiim ah laga bixiyo tallaabooyinka lagu horumarin karo isla xisaabtanka.

## Ku socota Hay’ada Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Qaxootiga (UNHCR), UNICEF, iyo hay’adaha kale ee gargaarka ee fuliya una dhaqdhaqaaqa ilaalinta dadka, iyo xiriiriyaha Qaramada Midoobay ee arrimaha bini’aadamnimo iyo gargaarka

- Taageerada tirakoob guud oo ay dowlada hogaaminayso oo lagu sameeynayo howlgal lagu diiwaangelinayo bulshooyinka ku barakacay Muqdisho si loo qiimeeyo baahidooda ammaanka. Howlgalkan diiwaangelinta ayaa xilli dambe lagu fidin doonaa qeybaha kale ee dalka, markii uu ammaanku saamaxo.
- In lagu cadaadiyo mas’uuliyiinta Soomaaliya inay xaqiijiyaan in dib udejin kasta ee mustaqbalka loo sameynayo dadka barakacay ay noqoto iskaa, waana in la geeyo ciidamo boolis ah oo masuuliyad leh oo gaar u ah goobaha dib udejinta loogu dajinayo barakacayaasha.
- Hay’adda Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Qaxootiga waa inay soo gabagabeysaa ayna fuliso istiraatiijiyada ilaalinta dadka, waana in ay si wax ku ool ah u xoojiso dadaalada indha-indheynta ee haatan jira ee ay wadaan kooxda ilaalada xuquuqda lagu tunto ee ka tirsan barakacayaasha iyo kooxaha taagta daran.
- In la kordhiyo dadka u shaqeeya qeybta ilaalinta dadka.
- Taageeridda in OHCHR si ballaaran loogu daro qaab dhismeedka cusub ee Qaramada Midoobay iyadoo awoodna u leh inay si wax ku ool ah ay u soo aruuriyaan xogta xuquuqda aadanaha, ayna soo tabiyaan.

## Ku socoto Golaha Ammaanka ee QM

- In OHCHR si ballaaran loogu daro qaab dhismeedka cusub ee Qaramada Midoobay oo wata ilo dhaqaale oo ku filan, iyo shaqaale khibrad u leh xadgudubyada kufsiga, awoodna u leh inay si wax ku ool ah ay u soo uruuriyaan xogta xuquuqda aadanaha, ayna soo tabiyaan.
- In laga codsado Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay in uu xaqiijiyo in dhamaan hay’addaha Qaramada Midoobay iyo xafiisyadooda ay ku leeyihiin gudaha Soomaaliya ay u hogaamsamaan habka howlkarnimada ah ee xuquuqda aadanaha ee ay QM ku taageerto ciidamada aan golaha ammaanka ka tirsaneyn, waana inay dib u soo tabiso sida loo fuliyay habkaa, iyo inay u sheegaan dhamaan heshiisyada waaxda maamulka khataraha iyadoo la raacayo tallabixintii muhiimka

ahayd ee kooxda dabagalka Qaramada Midoobay ay soo saartay taasoo ah in xogta la wadaagayo ay ka mid noqoto heshiisyada hoose iyo faafaahinta dadka fulinayaba.

- Saameynta guddi baaritaan oo Qaramada Midoobay ka tirsan—ama wax la barbar dhigi karo, ama hab ku haboon—si loo qoro ama loo diiwaan galiyo oo loo dajiyo dambiyada caalamiga ah ee khatarta ah ee lagu galay gudaha Soomaaliya iyo in tallo muhiim ah laga bixiyo tallaabooyinka lagu horumarin karo isla xisaabtanka.
- In la xaqiijiyo in kooxda indha-indheynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya iyo Eritrea ay hesho taageero ku filan si ay u fuliso waajibaadka xuquuqda aadanaha, iyo in la taageero in la qoro oo shaqo la siiyo ugu yaraan hal qof oo dheeraad ah oo khabiir ku ah xuquuqda aadanaha oo lagu daro kooxda.

## Ku socoto Xoghayaha Guud ee QM

- In la xaqiijiyo oo la ballaariyo laguna soo daro OHCHR howgalka Qaramada Midoobay, iyadoo la raadinayo taageerada dowlada Soomaaliya iyo Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee howlgalka ballaaran, si loo ballan qaado in la kordhiyo saraakiisha indha-indheeya oo ka shaqeeya xuquuqda aadanaha, iyo inay si cad usoo tabiyaan xadgudubyada xuquuqda aadanaha, oo ay ku jirto kuwa lagula kaco barakacayaasha ku sugan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo qeybaha kale ee Soomaaliya. Iyo in la xaqiijiyo ballaarinta howlgalada OHCHR inay helaan ilo dhaqaale oo ku filan oo ay ku jirto khubaro dhanka xadgudubyada kufsiga wax ka qabta.
- In laga codsado Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay in uu OHCHR ku daro ballaarinta howlgalka cusub iyadoo loo helayo ilo dhaqaale oo ku filan, oo ay ku jirto howlwadeeno khubaro ku ah xadgudubyada kufsiga, awoodna u leh inay si wax ku ool ah ay u soo uruuriyaan xogta xuquuqda aadanaha, ayna soo tabiyaan.
- Taageerida in la sameeyo guddi baaritaan oo Qaramada Midoobay ka tirsan—ama wax la barbar dhigi karo, ama hab ku habboon—si loo qoro ama loo diiwaan galiyo oo loo dajiyo dambiyada caalamiga ah ee qatarta ah ee lagu galay gudaha Soomaaliya iyo in talo muhiim ah laga bixiyo tallaabooyinka lagu horumarin karo isla xisaabtanka.

## Ku socoto Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha

- Taageerida in OHCHR si ballaaran loogu daro qaab dhismeedka cusub ee Qaramada Midoobay, ayna ka mid tahay shaqaale khibrad u leh xadgudubyada kufsiga, si dhaqso badana in loo ballaariyo jiritaanka OHCHR meel kasta oo macquul ah. In la xaqiijiyo in joogitaanka OHCHR ee Soomaaliya ay ballaariso indha-indheynta iyo la socodka xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo qeybaha kale ee Soomaaliya, iyo ballaarinta warbixinada ku saabsan xuquuqda aadanaha.

## Ku socoto Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP)

- Taageerida dadaalada lagu sameynayo tababaro ku habboon oo la siinayo xubnaha ciidamada qaranka ee qalabka sida ee Soomaaliya iyo booliska xuquuqda aadanaha, oo ay ku jirto xuquuqda dadka barakacay, iyo inay ka jawaabaan xadgudubyada kufsiga.

## Ku socoto Afhayeenka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha ee Dadka Barakacay

- In laga codsado casuumaad lagu tago Soomaaliya si loo daba galo arrimahaas.

# LAHAYSTAYAASHA WAARDIYEYAASHA GANJEELKA

## Xadgudubyada Ka Dhanka ah Dadka Wadanka Gudihiisa Ku Barakacay ee Ku Sugan Muqdisho, Soomaaliya

Dowladda cusub ee Soomaaliya ee la sameeyay Agoosto 2012-kii, ayaa qorsheyneysaa sanadkan in ay meelo kale dejiso tobanaan kun oo ka mid ah dadka dalka gudihiisa ku barakacay ee ku sugan Muqdisho. Inta badan dadkaan waxay soo gaareen 2011-kii caasimada uu dagaalka kala qoqobay, waxayna ka cararayeen macaluul iyo colaad, balse si ka gedisan sidii ay filayeen, ayaa waxay inta badan la kulmeen cadaawad iyo xad gudub.

Iyadoo lagu saleeyay baaritaan qaatay in ka badan hal sano, ayaa warabixinta oo loo baxshay *Lahaystayaasha Waardiyeyaasha Ganjeelka: Xadgudubyada Ka Dhanka ah Dadka Wadanka Gudihiisa Ku Barakacay ee Ku Sugan Muqdisho, Soomaaliya*, waxay sharaxaysaa xaalada ay ku sugan yihiin barakacayaasha caasmida ku sugan laga soo bilaabo markii macaluusha ay maraysay halkii ugu saraysay bishii Luuliyo 2011-kii ilaa dhamaadkii 2012-kii. Warbixintu waxay xuseysaa xadgudbyo ba'an oo dhinaca xuquuqda aadanaha ah oo loo gaystay dadka barakacay, xadgudubyadaas oo ay ka mid yihiin kufsi, garaacid, xadgubyo salka ku haya haybta iyo jufada uu qofka ka soo jeedo, xanibaado dhinaca helitaanka cunada iyo hoyiga, in si xoog ah dadka looga saaro meeliha ay deggan yihiin iyo ciqaab kale oo aargoosi ah marka ay isku dayaan in ay ka dacwoodaan ama ay ka cawdaan xadgudubyada. Xadgudubyada ugu daran waxaa gaystay maleeshiyo iyo xoogaga ammaanka- oo inta badan xiriir la lahaa dowlada ku meel gaarka- kana howl gali jiray xerooyinka barakacayaasha dhaxdooda ama meelo ku dhow dhow. Maleeshiyada waxaa inta badan lala xiriiriyay ama ayba ka amar qaadan jirtay maamulayaasha xerooyinka barakacayaasha ee loo yaqaano "Waardiyeyaaasha Ganjeelka."

Warbixintu waxay sharaxaysaa sidii ay dowladii ku meel gaarka ahayd ugu guul daraysatay in ay difaacdo bulshooyinka barakacay waxayna ku boorinaysaa dowladda cusub in ay wax ka barato guul darooyinkii hore iyo in ay hubaal ka dhigto in la difaaco gacana la siiyo mustaqbalka oo ay ku jirto xitaa marka meelo kale la dajiyo. Talaabooyinka kale ee ay warbixintu ku talinayso waxaa ka mid ah in dowladu la xisaabtanto xubnaha maleeshiyada iyo xoogaga ammaanka ee xadgubyada galmada iyo dambiyada kale u geysta barakacayaasha. Waa in beesha caalamka iyaduna ay hubaal ka dhigtaa in isla xisaabtanka la siiyo mudnaanta koowaad marka ay dhinaca siyaasada kala tacaamulayso Soomaaliya iyo sidoo kale gargaarka baniaadanimo iyo kan dhinaca horumarka.



*Dumarka barakacayaasha ah qaarkood oo saf ugu jira raashin gargaar ah degaanka Hodan ee magaalada Muqdisho. Dhowr ka mid ah ayaa soo sheegay in la sawiray intii ay socotay cunno qeybinta oo ay sawireen hay'adaha gargaarka balse haddana cunnaddii gargaarka ahayd ayaa waxaa kala wareegay "Waardiyeyaasha Ganjeelka."*

*©2011 si gaar ah ayaa loo leeyahay xaquuqda daabacaada ee sawirkan.*

**hrw.org**